



Baaritaanka COVID-19

Goormaan helayaa baaritaanka COVID-19?

- Hadaad leedahay astaamaha COVID-19?
- Hadaad [khatar sare ugu jirto jirro aad daran](#) dhawaana aad la kulantay qof qaba COVID-19.
- Hadaad tahay xirrirka dhow ee xubin qoys ama hadaad khatar dhexdhexaad ah ama sare ugu jirtid oo aad la kulantay qof qaba COVID-19.



Yaa khatar ka sareeysa oo daran ugu jira jirro?

- Dadka jira 60 sanno ama ka weyn
- Dumarka uurka leh
- Aborijiinka, Torres Strait Islander iyo dadka Pacific Islander ah (laga bilaabo da'da 35 sanno iyo wixii ka weyn)
- Dadka aadka u buuran, sonkorta qaba, qaba cudurka wadnaha oo daran, cudurka sambabada ee soo noqnoqda (*oo ay ku jiraan kuwa neefta aadka u daran ee u baahan in isbitaal la dhigo 12kii bilood ee ugu danbeeyey*), cudurka kelyaha ama beerka soo noqnoqda ee daran), kansarka firfircoon ama qofkii difaaca jirkiisu daciif yahay.
- Dadka qaarkii oo iin leh oo ay ku jiraan kuwa qaba iin saameynaysa sambabadooda, wadnaha ama habka difaaca jirka
- Degenayaasha xannaanada dadka waa weyn iyo tahsiilaadka xannaanada naafada
- Dadka jira 18 sanno iyo ka weyn ee aan tallaalneyn

Waa maxay baaritaanka COVID-19 ee aan qaadanayo?


Waxaa jira **laba baaritaano ah oo kala duwan** waxaad iska jeegareyn kartaa COVID-19. **Baaritaanka degdega ah ee antigen** (RAT) oo aad adigu sameynsan karto iyo **PCR** baaritaanka (saamiga dhuunta iyo sanka) oo lagu sameeyo rugta **baaritaanka**.

- **Haddii aad ugu jirto khatar sare jirro daran** waa inaad qaadataa **baaritaanka PCR**. Haddii aad rabto inaad u hesho natiijada baaritaanka PCR si dhakhso ah, baaritaanka degdega ah ee antigen (haddii aad mid haysato) intaad sugeysid natiijada baaritaanka PCR.
- Haddii **aadan** ugu jirin khatar sare oo jiro daran ah, samee baaritaanka degdega ah ee antigen haddii dhakhtarkaagu uu kuu sheego inaad samayso baaritaanka PCR.



Maxaan sameeyaa haddii layga helo COVID-19?

- Haddii aad hesho natiijada baaritaanka **PCR oo posatiif ah**, xitaa haddii aadan lahayn wax astaamo ah, waxaad qabtaa COVID-19. Waa inaad raacdaa tallada dadka [bosatiifka ah ee laga helo COVID-19 iyo si amaan ah ugu maareynta COVID-19 guriga](#).
- Haddii aad tahay boosatif sida baaritaanku sheegay [ka diiwaangeli natiijada NSW Service](#) raacna talada dadka baaritaankoodu [muujiyey boosatiif COVID-19 uguna maaray guriga COVID-19 si amaan ah](#).



Haddii aad qabto walaac caafimaad una baahan tahay kaalmada luuqada wac **TIS 131 450** weydiina Health Direct Tel: **1800 022 222**.